



Masraxa ardayda Alliance ee ku yaala Meek oo wax ka qabtay Shakespeare

Isku tibaajib waqti dheer. Shaqsiyaada kala duwan. Sadarro ka socda Ingiriisigii Duugga ahaa. Ardayda Alliance ee ku yaala Meek ayaa bilaabaya in ay Gabayo “Bard” ku soo bandhigaan soo saaristooda u dambaysay ee “A Midsummer Night’s Dream.”

“Sanadkii la soo dhaafay wuxuu sanadkeenii ugu horreeyay ee waaxda masraxa ,” ayay sheegtay Rebecca Rothery, oo macallinka maxraxa ka dhaca Alliance ku yaala Meek. “Inta badan ardayda ka tirsan soo saarkani weligood kama qayb qaadan ciyaar, haba sheegin Shakespeare.”

Dugsiga sare ee la kala dooran karo wuxuu leeyahay qiyaastii 130 ardayda, oo inta badan la kulma arimo dhowr ah, oo ay ku jiraan guri la'aan, walwal iyo caqabado dhanka waxbarashada ah.

“Waa mid farxad leh runtii in la daawado ardaydayda oo koraysa oo baranaya in ay soo bandhigaan ciyaarta. Marka ay akhriyaan sadarada Ingiriisigii Duugga ahaa iyaga oo kalsooni qaba isla markaana fahamsan xaqiiqdii waxay abaalmarin u tahay iyaga iyo aniga,” ayay sheegtay Rothery said.

Maadaama waaxda masraxa ee Alliance ay cusub tahay, dharka la xiranayo waxaa ku deeqday Jaamacadda George Fox University iyo dugsiyada sare ee kale ee PPS. Waaxyaha kale ee maxraxayada PPS waxay ku deeqeen qayb loogu talagalay soo saarka.

Waaxda masraxu waxay dhigaysaa laba bandhig, Maarso 21 iyo 22, iyaga oo dhacaya 7 subaxnimo. Casho ayaa la bixin doonaa bandhigyada ka hor, iyada oo la isticmaalayo cunto ay ku deeqday New Seasons.

“Tani waa shaqo dhab ah oo jacayl ku dheehan yahay iyo dadaalka beesha,” ayay sheegtay Rothery.

-Pamela Jordan